



EUROPEAN UNION  
Asylum, Migration  
and Integration Fund



## FOOMKA OGGOLAASHADA QAABKA

### MACLUUMAADKA SHARCIGA

Iyadoo la raacayo sharciga (Xeerka Guud ee Ilaalinta Xogta ("GDPR"), Sharciga 4624/2019), waxaan kugu wargalineynaa habka u socodka xogtaada shakhsi ahaaneed markii aad timaado Xarunta Qaabilaadda iyo Aqoonsiga (RIC) / Xarunta Qaxootiga iyo Muhaajiriinta.

#### 1. Maareeyaha xogta

Hay'add sharciga Gaarka ah oo uu kormeerayo Wasiirka Caafimaadka oo wata magaca "**Hellenic National Health Organization (HNPHO, EODY)**", Agrafon street no. 3-5, PC 151-23, Maroussi, Attica, tel. 210 5212000

#### 2. Macluumaadka la xiriirka xafiiska ilaalinta xogta

Arrin kasta oo la xiriirta ilaalinta macluumaadkaaga shaqsiyeed waxaad la xiriiri kartaa Sarkaalka Ilaalinta Macluumaadka ee HNPHO (EODY) cinwaanka e-maylka: [dpo@eody.gov.gr](mailto:dpo@eody.gov.gr).

#### 3. U jeedada iyo asaaska sharciyeed oo xog aruurinta ku saabsan

**Ujeedada laga shaqeynayo macluumaadkaaga shaqsiyeed waa:**

a) aqoonsigaaga markaad timaado Xarunta Qaabilaada iyo Aqoonsiga (RIC) / Xarunta Hoyga Qaxootiga iyo Soogalootiga, xafidaada diiwaankaaga caafimaad iyo bixinta adeegyada caafimaadka

b) Wadahadal lala yeesho mas'uuliyiinta dowladda iyo adeegyada si loo xalliyo arrimo kala duwan oo la xiriira xaaladdaada shakhsi ahaaneed (is-dhexgalka deegaanka, raadinta hoyga la ilaaliyo, bixinta dukumiintiyada, iwm.)

c) la xiriirida isbitaalada arrimaha ku saabsan caafimaadkaaga

x) Xiriir lala sameeyo Ururada aan Dowliga ahayn, ee ka hawl gala maaraynta arrimaha qaxootiga.

Saldhigyada sharci ee lagu shaqeynayo macluumaadkaaga shaqsiyeed waa kuwa soo socda:

U hogaansanaanta waajibka sharciga ah ee HNPHO (EODY) si ay u bixiso adeegyada caafimaadka maskaxda iyo aasaasiga ah, ilaalinta danahaaga muhiimka ah, markii loo baahdo, qaadida tillaabooyinka lagu ilaalinayo caafimaadka bulshada, waajibaadka dhakhaatiirta iyo kalkaaliyayaasha caafimaadka inay hayaan diiwaan caafimaad, bixinta caawimaadda adiga, wadashaqeynta HNPHO (EODY) iyo dhammaan hay'adaha dowliga ah ee aqoonta u leh arrimaha ku saabsan arrinta qaxootiga.

<sup>1</sup>(no. 6 par. 1 per. a, c GKPD, no. 9 par. 2 per. a, c, h, θ GKPD, no. 22 par. 1 L. 4624/2019, no. 2 L. 4633 /2019, No. 123 L. 4549/2018, No. 14 L.3418 / 2005, No. 33 L. 4368/2016, No. 11 L. 2731/1999, No. 58 L. 4686/2020, No. 55par. 1 Law 4636/2019)

#### **4. Qaatayaasha**

Si loo fuliyo ujeedooyinka aan horey usoo sheegney, waxaa laga yaabaa inaan u baahanahay inaan u gudbino xogtaada shakhsi ahaaneed Isbitaalada, Ururada Aan Dowliga Ahayn, Taliyayaasha Xarumaha Hoyga, Shaqaalaha Caafimaadka ee Ciidamada Qalabka Sida ee ka howlgala Xarumaha Hoyga iyo maamul kasta oo awood u leh.

#### **5. Muddada keydinta Xogta Qofka**

Muddada keydinta macluumaadkaaga shaqsiyeed waxaa go'aaminaya bixinta nr. 14 gayb. 4 ee Sharciga 3418/2005 (Xeerka Anshaxa Caafimaadka) iyo sidoo kale dhammaan talaabooyinka qaran iyo kuwa caalamiga ah ee loo qaaday maareynta arrimaha qaxootiga.

#### **6. Xuquuqda aad u leedahay ilaalinta macluumaadkaaga shakhsiyeed**

Waad ku dhaqmi kartaa xuquuqda helitaanka, sixitaanka, iyo tirtiraadda (tirtirka) iyo xaddidaadda howsha adigoo u diraya codsi emaylka: [dpo@eody.gov.gr](mailto:dpo@eody.gov.gr).

Haddii aad u aragto in mid ka mid ah codsiyadaada ey ku qancin, waxaad xaq u leedahay inaad la xiriirto Hay'adda Ilaalinta Macluumaadka Shakhsiyeed (<http://www.dpa.gr>), Kifissias Ave. no. 1-3, PC 115 23, Athens, tel. + 30-210 6475600, fakis + 30-210 6475628.

Waan akhriyay oo waan fahmay macluumaadka ku qoran warqaddan. Waa laygu wargaliyay ka shaqaynta xogtayda shakhsiga ah waana bixiyay ogolaanshahayga.

..... (goobta).../...../20

#### **Ka Faa'iidayste**

**Magaca: .....**

**Magaca awoowga: .....**

**Magaca aabaha: .....**

**• Saxeex:**

#### **Dhexdhexaadiyaha dhaqameedka (Turjubaan)**

**Magaca: .....**

**Magaca awoowga:.....**

**Ururka : .....**

**• Saxeex:**